



CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

Talooyin Kooban

Dajinta Qorshaha Tageerada Habdhaqanka Wanaagsan

Lixda Talaabo ee Tageerada Habdhaqanka Wanaagsan

1. In Ladhiso Kooxda Taageerada Habdhaqanka Wanaagsan
2. Qorshayn Shaqiga Kukooban
3. Qiimeynta Dabeecadda Shaqaynaysa
4. Qiyaas Dajin
5. Dajinta Qorshaha Tageerada Habdhaqanka Wanaagsan
6. Kormeerka Natijoyinka

Qorshe taagereya habdhaqanka wanaagsan waa qorshe hawleed qeexeya tallaabooyin khaas ah oo loo isticmaali karo kobcinta guusha cunuga iyo kaqaybqaadashada hawlo maalmeedka iyo casharada. Qorshaha markii ladajinayo waxaa la isticmaalaa hab shaqiga kukooban. Tani macnaheedu waxaa weeyee in ay kooxdu wada shaqaysay si ay:

- U wadaagaan rajooyinka, himilada, iyo hadafka cunuga.
- U qeexaan waxa uu cunugu kufiicanyahay, waxa uu jecelyahay, iyo kartidiisa.
- U qeexaan xeeladaha kahortagga iyo wax qabadka si uu cunugu uguuleeysto.

Ujeedada dajinta qorshaha tageerada habdhaqanka wanaagsan maaha in cunuga la "cinqaabo" balse in cunuga lataageero waxna labaro xirfado cusub iyo qaabab kayareeya kanabaabi'iya dabeecadaha adag.

Qodobada Laiska Rabo ee Qorshaha Tageerada Habdhaqanka Wanaagsan

Qorshaha tageerada habdhaqanka wanaagsan waa in koox ahaan loo wada dajiyo. Inta kooxda dajinta katirsan waa in ay kakooban yihiin dadka cunuga noloshiisa kaqayb qaatay (waalidiin/qaraabo, shaqaalaha caruurta daryeela, oo shaqaalaha kale oo lashaqeeya).

1. Sharaxaadda Dhaqanka

- Dhaqanku waa dhaqan see ah.
- Sharaxaad faahfaahsan oo sax ah bixi si dadka caruurta qeymeeya ay u aqoonsadaan dhaqankaas.
- "Meesha" iyo "goorta" uu dhaqankaas dhaco.

2. Macnaha uu Leeyahay Dhaqanka

- "Sababta" uu dhaqankaan u dhaco.
- Waxa cunuga kudhiiragalinaya dhaqaankaan in uu kudhaqmo.

3. Xeelado Hore oo Lagu Hagay Dhaqanka

- Wax wax-kaqabad ah maxaa la isku dayey?
- Maxaa hore cunuga ushaqeeyey?

4. Dajinta Hadafka Dhaqanka/Xirfado Isbedel Keena

- Habdhaqanka wanaagsan oo siyaadaada ah oo uu cunugu ubaahanyahay in uu barto si uu ugu bedelo dhaqanka adag muxuu yahay?
- Qeex dhaqanka cusub/xirfada oo uu cunugu ubaahanayo in uu barto si uu bedelo dabeecadda adag.
- Sidee bay xirfaddu/xeeladuhu oga caawinayaan cunuga in baahidiisa lakaafiyo?
- Yaa baraya cunuga xirfadahaan cusub?
- Xeeladaha isbedelka keenaya waa in ay:



- Yihiin kuwo cunuga ufudud
- Yihiin kuwo hufan
- Yihiin kuwo macno ugu fadhiya dhaqanka cunuga.

5. Xeeladaha Kahortagga

- Xeelada yaraynaya in uu cunugu dabeecad adag kukaco (habeynta bay'adda, waxbarashada ama hawsha ay caruurta qabanayso oo hadba labedelo, cunuga oo aad soo jeediso, in lakaalmaysto muqaallada, iwm.)

6. Xeeladaha Natijada leh

- Tilmaamaha dadka waaweyn ee qeexaya jawaabta ay la imaanayaan dadka waaweyn markii ay dabeecad adag timaado.
- Xeelado kadhigaya dabeecadaha adag wax aan wax tar lahayn.
- Xeeladaha wanaag xoojinta oo kudhiiragalinaya cunuga in uu kudhaqmo xirfadaha cusub iyo xeeladaha.

7. Xeeladaha Muddada Dheer

- Cunuga oo loo dajiyo yool muddo dheer ah.
- Waalidka iyo macalinka yoolalka iyo hawada ay u qabaan cunugga.

8. Nadaamka Kusifaysan Nabadda

- Nidaamka laraacayo si loo hubiyo nabadgalyada cunuga iyo dadka kale.

9. Qorshaha Tallabada

- Soo koobida ujeedooyinka gaarka ah iyo talaabooyinka loo baahanyahay si loo hubiyo fulinta qorshaha joogtada ah.
- Aqoonsiga talaabooyinka gaarka ah, qofka mas'uulka ah, taariikhda lafilayo in la dhamaystiro iyo ficilada dabagalka hadii loo baahdo.

10. Sharaxaadda Guusha

- Waa maxay shuruudaha loo isticmaali doono si loo qaymayo horumarka?
- Maxaytahay xogta la aruurin doono?
- Sidee loo diwaan galinaya?
- Yaa kormeereya qorshaha oo qiimeyn doona wax-ku-oolnimadiisa?

11. Qorshaha isgaarsiinta

- Sidee qorshaha loola wadaagi doona qof kasta oo ay khusayso oo ubaahan in uu wax ka ogaado oo qorshaha hir galin doona?
- Samayso qorshe xiriir oo todobaadle ah si loo kormeero horumarka

Inkasta oo dajinta Qorshaha tageerada habdhaqanka wanaagsan ay u egtahay wax dhib badan marka hore, waa tilaabo muhiim ah oo lagu taageero cunug dabeecadiiso ay saamayn kuleedahay in uu horumar gaaro.

Xog dheeraad ah

Association for Positive Behavior Support

<https://www.apbs.org>

Center for Social Emotional Foundations of Early Learning

<http://csefel.vanderbilt.edu>

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo
www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.